



Allahayow waxaan kaa magan galayaa cadaabta qabriga, iyo cadaabta naarta, fitnada nolosha iyo dhimashada, iyo fitnada masiixu dajaal

Abii Hurayra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Wuxuu ahaa Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- mid ku ducaysta oo dhaha: "Allahayow waxaan kaa magan galayaa cadaabta qabriga, iyo cadaabta naarta, fitnada nolosha iyo dhimashada, iyo fitnada masiixu dajaal." hadalkale oo muslim leeyahay wuxuu ahaa: "markuu midkiin dhamaysto ataxiyaadka u dambeeya, Ilaahay ha ka magan galo afar: cadaabta jahanama, cadaabta qabriga, fitnada nolosha iyo dhimashada, iyo sharka masiixu dajaal."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu ahaa mid Ilaahay ka magan gala afar, ataxiyaadka u dambeeya ka dib, iyo salaama naqsiga ka hor, wuxuuna nafaray inaan Ilaahay ka magan galno afartaa, Tan 1aad: cadaabta qabriga. Tan 2aad: cadaabta naarta ee maalinta qiyaamaha. Tan 3aad: fitnada nolosha, ee ah shahawaatka aduunyada ee xaaraanta ah iyo shubuhaadka lagu lumo iyo fitnada dhimashada, waa marka sakaraadku jiro, oo islaamnimada ama sunada uu ka leexdo, fitnada qabriga sida su'aasha labada malag. Tan 4aad: fitnada masiixu dajaal ka soo bixidoona aakhiru samaanka, Ilaahayna adoomadiisa ku intixaamayo, wuxuuna sigaar ah ugu xusay fitmadiisa oo aad u wayn iyo dadka oo uu baadiyeynaayo.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3103>

